**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Wasaaradda Caafimaadka**
**& Daryeelka Bulshada**
**Xafiiska Wasiirka**

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الصحة ورعاية المجتمع
مكتب الوزير

**Somali Federal Republic**
**Ministry of Health & Human Services**
***Minister Office***

**Ref: MOH&HS/MOHO/0307/FEB/2023** **19/Feb/2023/Mogadishu**

# ASAASIDDA HAY'ADDA KUMEELGAARKA AH EE MAAREYNTA DAAWADA WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO DARYEELKA BULSHADA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Anigoo tixraacayna Sharciga **Lr.9, qodobkiisa 4aad, soona baxay Tr.26 Jan 1989**, kuna saabsanaa maareynta Daawada dadka iyo Qalabka caafimaadka, iyo Qodobka 2aad ee siyaasadda Qaranka ee Daawada oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada JFS, 2014, ayaan aasaasayaa, soona nooleynayaa Hay'adda Kumeelkgaarka ah ee Maareynta Daawada ee hoos imaanaysa Wasaaradda Caafimaadka iyo Adeega Bulsha JFS oo fulinaysa Shaqooyinka asaasiga ah ee la xariira Maareynta Daawada.

Hay'adda KMG ah Maareynta Daawada (INMRA) waxay hoos imaanaysaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada JFS ayadoo ah agaasin gooni ah. Hay'addu waxay mas'uul ka tahay Nidaaminta, Xakamaynta iyo Maareynta daawada, Maadooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, badqabka Cunnada iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan si waafaqsan habraacyada ay wasaaraddu dajisay iyo hannaanada caalamiga ah ee lagu nidaamiyo Daawada inta laga ansixinayo Sharciga Daawada.

Hay'addan kumeel-gaarka ah waxay fulin doonta hawlaha asaasiga ah ee la xariira nidaaminta iyo maareynta Daawada oo ay ku jiraan diiwaan gelinta, kormeerka, ka-feejignaanta khataraha Daawada, Kormeerka Daawada suuq taalo, iyo hubinta tayada , waxtarka Daawada iyada oo la adeegsanayo siyaasad iyo habraacyada loo dejiyay oo ay ka mid tahay isticmaalka shaybaaro la aqoonsanyahay.

## i. UJEEDOOYINKA HAY'ADDA

**Ujeedooyinka Hay'adda waxaa ka mid ah:**

1) In la hubiyo waxtarka, khatar la'aanta, iyo Tayada daawada, Maadooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, badqabka Cunnada iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan ee loo soo dhoofiyo dalka Soomaaliya.
2) Waxay Masuul katahay xakameeynta, nidaaminta iyo maareynta daawada, Maadooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan si looga hortago waxyeelada ka dhalan karta.
3) Inay diyaariso habraacyadii lagu maareyn lahaa daawada, Maadooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan ee suuqa laga heli karo.

4) Inay ilaaliso badqabka dadweynaha iyadoo la hubinayo in dawooyin tayo leh dalka laga heli karo iyadoo loo maraya diiwaangelinta Daawada.
5) In la siiyo shati diiwaangelinta adeegyada daawada oo ay ku jiraan farmashiyga tafaariiqda, kuwa jumlada, soo dejinta iyo dhoofinta daawada, Maadooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan.
6) In la hubiyo lana kormeero daawada marka ay dalka la soo galinayo ( dakada iyo garoomada iwl), lana sameeyo kormeer Daawada suuq-taalo si loo hubiyo tayada daawada inay waafaqsantahay/u hoggaansantahay nidaamka maareynta daawada.
7) In la xaqiijiyo lana hubiyo tayada daawooyinka laga shikiyey iyada oo la isticmaalayo nidaam lagula heshiinayo shaybaaro aqoonsi leh, lana shaaciyo warbixinta daawooyinka tayadoodu hoosayso iyo daawooyinka been abuurka ah.
8) In la xoojiyo nidaamka lagu maareeyo daawada dalka iyada oo loo marayo tobabarka shaqaalaha, diyaarinta habraacyo iyo shismaha hay'adda (sida xafiisyo, iyo qalab).
9) Ka qayb noqoshada nidaamka ay dajisay Ha'aydda Caafimaadka aduunka oo lagula soconayo Tayada daawooyinka ganacsiga ku jira.
10) In la dadajiyo dhamystirka sharciga.

## ii. SHAQOOYINKA UGU MUHIIMSAN EE NIDAAMINTA IYO MAAREYNTA DAAWADA

Hay'adda KMG ah Ee Maareynta Daawada waxay masuul ka tahay fulinta shoqooyinka hoos ku xusan:

1) Kormeerka warshadaha Daawada lagu sameeyo, farmashiyada, baqaarada Daawada iyo daabuleynta/qeybinta Daawada.
2) Bixinta ogolaanshaha suuq keenista iyo shati siinta daawada.
3) Hubinta dhibla'aanta daawada (ka fejignaanta khatarta daawadda iyo la socoshadda daawadda suuqa taala).
4) Ilaalinta tayada daawada.
5) Badqabka Cunnada Daaweysan
6) Xakamaynta daawooyinka maanka dooriya iyo kuwa dhimirka.
7) Xakamaynta xayeysiinta daawadda.
8) Xakameynta tubaakada

## iii. SHAQO GELINTA HAY"ADDA

Si loo howlgeliyo Hay'adda KMG Maareynta Daawada waa in la raacaa tallabooyinkan hoos ku xusan:

**1. Magacaabista Hoggaanka Iyo Shaqaale Hay'adda:**

- **Hoggaanka:** Agaasimaha Hay'adda KMG ah Maareynta Daawada Wuxuu masuul ka yahay guud ahaan hoggaaminta, maareynta, korjoogtaynta iyo fulinta howlaha maalinlaha ah ee hay'adda,

Waxuuna ugudbiyaa warbixinta Hay'adda, Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada JFS

- **Shaqaalaha**: Waa shaqaale farsamo oo muhiim u ah fulinta howlaha lagama maarmaanka u ah nidaaminta iyo maareynta daawada, maadooyinka baayolojiga, qalabka caafimaadka, Daawada dhireedka iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan, sidaa darteed, wasaaradda caafimaadku waa inay xaqiijinaysaa in la magacaabo, shaqaalo farsamo oo tayo sare, hufnaan iyo akhlaaqba leh oo fulin kara hawlaha muhiim ka ah ee hay'adda. Shaqaalaha waa in lagu soo magacaabaa qaab hufanaan iyo sinaan ah iyada oo loo eegayo shahaadooyinka iyo xirfadaha ay leeyihiin iyo sida loogu baahanyahy ama  ay ugu haboon yihiin goobta gaarka ah ee shaqadda.

**2. Kobcinta xirfadda shaqaalaha  iyo Tayada Hay'adda:**

- Diyaarinta habraacyadii lagu shaqeyn lahaa sida siyaasad, qorshayaal iyo foomam
- ku tababaridda shaqaalaha hay'adda a Shaqooyinka asaasiga ah ee lagu maareeyo Daawada sida, Diiwaagelinta, kormeerka, ka-feejignaanta khataraha Daawada, ilaalinta Tayada Daawada suuqa-taalo, iyo hubinta Tayada Daawada.
- in la sameeyo iskaashiyo iyo u qareemid lagu xoojinayo Tayada Hay'adda si ay u fuliso hawlaha asaasiga ah ee maareynta Daawada.  Waxaa kamid ah la xariiridda Hay'adaha caalamiga ah ee naga taageera arimaha lagu hormariyo caafimaadka iyo hay'adaha lamid ka ah.

**3. Asaasidda habkii lagu fulin lahaa Shaqooyinka Hay'addda:**

- Wasaaradda Caafimaadkaiyo  Daryeelka Bulshada  JFS waxay dajin doontaa hab la iskugu dubaridi lahaa si loo hubiyo ka-qaybgalka saamileyda hirgelinta Waajibaadka shaqo ee hay'adda.
- Xafiisyadaas waxaa ka mid ah: Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha JFS, Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda, Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Wasaaradda Maaliyadda, Wasaaradaha Caafimaadka Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah  Dowladda Federaalka, Maamulka Gobalka Banaadir, Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (SoBS), Hay'adaha fulinta sharciga, Rugta ganacsiga iyo warshadaha Soomaaliyeed, ururka ganacsatada  Daawooleyda Soomaaliyeed(SOMIDA), Ururka Dawayaqaanka Soomaaliyeed, iyo Ururka Dhakhaatiirta Soomaaliyeed.

**4. Hirgelinta Shaqooyinka asaasiga ah ee Maareynta Daawada:**

Hay'addu waa inay bilowdaa funlinta Shaqooyinka soo socda:

- Aruurinta xogta shirkadaha iyo hay'adaha daawada soo dejinta, kuwa jumlada, iyo tafaariiqda ku gada iyo daawada,  Madooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka  la isku qurxiyo oo Daawada kujirto ee dalka la keeno iyadoo la adeegsanayo habraac calami ah.

Tel: +2526-618706093 E-mail: minister@moh.gov.so Mogadishu-Somalia

- Diiwaangelinta iyo shati-siinta shirkadaha soo-dejinta daawada, sida jumlada, iyo tafaariiqda uga ganacsada iyo daawooyinka, maadooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan.
- Diiwaangelin kumeel gaarka ah ee loo daawada, madooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan ee dalka la keeno iyadoo la adeegsanayo habraac calami ah.
- In kormeerayaal la geeyo goobaha muhiimka ah ee laga soo galiyo daawada sida dekedaha waaweyn iyo garoomada caalamiga ah. Wasaaradda Caafimaadka iyo daryeelka bulshada JFS waxay kulama iyo wadahadal la yeelan doonta hay'adaha ay khuseyso oo ay ka mid yihiin Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada, Wasaaradda Dekadaha, iyo Gaadiidka Badda, si loo fududeeyo in la geeyo kormeerayaal ka socda Hay'adda oo ku sugnaan doona dekedaha waaweyn iyo garoomada caalamiga ah si loo fuliyo Shaqooyinka la xariiro kormeerka Daawada iyadoo la raacayo habraacyo ay wasaaraddu udejinayso.
- Bixinta oggolaanshaha soo dejigadda shixnadaha daawada, madooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan ee dalka la keeno.
- khidmada haynta waa in lagu codsadaa is diiwaangelinta aysan dhicin ka hor ee daawada, madooyinka bayoolajiga, qalabka caafimaadka, daawo dhireedka, iyo agabka la isku qurxiyo oo daaweysan, si loogu hago Ganacsatada Daawada si loo siiyo shahaadada shatiga oggolaanshaha suuqkeenista oo ku meel gaadhka ah ee shirkadaha soomaalida ka dib marka lasoo gudbiyo caddeynta hishiiska nootaayo ee u dhaxeeya shirkadda Daawada sameeyso iyo Ganacsataha Soomaaliyeed.

**5. Dardar gelinta ansixinta Hindise sharciyeedka Daawada somaaliyeed.**

- Wasaaradda Caafimaadka iyo Hay'adda KMG ah Maareynta Daawada waxay isku dubaridid,iyo dabagal ku sameynsaa ansixinta Hindise sharciyeedka daawada, kaas oo marka la ansixiyo saldhig u noqon doona aasaaska Hay'adda Maareynta Daawada Soomaaliya.

Aasaaska Hay'adda Ku-meel-gaarka ah ee Maareynta Daawada waxa ay dhaqan galaysaa laga bilaabo taariikhda uu saxiixo Wasiirka Caafimaadka iyo Daryeelka bulshada JFS.

**Wadashaqayn wacan**

---

**Dr. Cali Xaaji Aadam Abuubakar,**

Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada, JFS

Tel: +2526-618706093 E-mail: minister@moh.gov.so Mogadishu-Somalia